DAWLADDA DEGAANKA SOOMAALIDA

Xafiiska Golaha Xildhibaanada

GOLAHA XILDHIBAANADA

DAWLADDA DEGAANKA SOOMAALIDA

የሶማሌ ክልላዊ መንግስት ምክር ቤት

Xeer-nidaameedka Go'aaminta Khidmadda Garsoorka ee Maxkamadaha Deegaanka

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

Xeer-nidaameed Tirsi 8/2018

Xeer-nidaameedka Go'aaminta Khidmadda Garsoorka ee Maxkamadaha Deegaanka

Maadaama xeerka dhaqangalka ku ah habka bixinta Khidmadda garsoorka ee Maxkamadaha Deegaanku u yahay xeer la soo saarary sanadkii 1945 ee T.I. kaasi oo tan iyo markii la soo saaray aan waxka beddel lagu sameeyn , sidoo kalena ay jiraan kiisas badan oo xeerkani uusan daboolayn islamarkaana loo baahanyahay in la soo saaro xeernidaameed go'aamiyaa Khidmadda Garsoorka oo la jaanqaadaya wakhtiga iyo duruufaha jira;

Maadaama oo ay lagama-maarmaan noqotay in la helo nidaam u qalma bixinta Khidmadda garsoorka, islamarkaana ku habboon heerka adeeg bixinta garsoorku uu gaadhsiisan yahay wakhti xaadirkan iyo adeegyada ay bixiyaan maxkamadaha Dawladda Deegaanka Soomaalidu;

Sidaasi awgeed, hab wafaaqsan Qodobka 49(3)(b) ee Dastuurka dib loo habeeyey ee Deegaanka iyo Qodobka 56[aad] ee Bayaanka Aasaaska Maxkamadaha DDS ee tirsigiisu yahay 206/2013, wuxuu Golaha Deegaanka Soomaalidu Bayaamiyay sidan:-

QAYBTA KOOWAD

QODOBBO GUUD

1 **Ciwaan Gaaban**

Xeer-nidaameedkan waxaa loogu yeedhi karaa "**Xeer-nidaameedka Go'aaminta Khidmadda Garsoorka ee Maxkamadaha Dawladda Deegaanka Soomaalida" ee Tirsigiisu yahay 8/2018 T.I.**

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

2 **Qeexid**

Haddii weedha eraygu ku jiro aanu micne kale siinin xeer-nidaameedkan dhexdiisa: -

1. **"Bayaan"** waxaa loola jeedaa Bayaanka Aasaaska Maxkamadaha Dawladda Deegaanka Soomaalida ee tirsigiisu yahay 206/2013.
2. **''Maxkamadaha"** waxa loola jeeda Maxkamadaha lagu aasaasay si waafaqsan Dastuurka dib loo habeeyay ee DDS, iyo Bayaanka tirsigiisu yahay 206/2013 ee Aasaaska Maxkamadaha Dawladda Degaanka Soomaalida. Kuwaas oo kala ah; Maxkamadda Guud, Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Degmada.
3. **Rajistaraar"** waxa loola jeedaa qofka uu Guddigu hab-sharciga waafaqsan usoo magacaabo, iyada oo aan waxba loo dhimaynin waajibaadka lagu siiyay shuruucda kale, islamarkaana loo xilsaaray maamulka Khidmadda Garsoorka.
4. **"Dacwad Lacageed**" waxaa loola jeedaa dacwada laga garsoorayo ee la xidhiidha arrimaha ku saabsan lacagta ama hanti kasta oo raasamaal ah oo guurto ama ma-guurto ah oo Lacag lagu qiimeeyn karo.
5. **"Dacwadaha aan lacagta lagu qiimayn karin'** waxaa loola jeedaa kiisaska dabci ahaan lagu qiyaasi Karin Lacag ama arrimaha cabashooyinka ee la xidhiidha arrimaha xuquuqaha shakhsi ahaaneed.
6. **"Cabasho'** waxaa loola jeedaa dacwada, dacwoodaha, dacweysanaha, codsiga soo dhexgalka dacwadda, codsiga racfaanka, codsiga dib-u-eegista iyo dhammaan codsiyada hab-sharciga waafaqsan usoo gala Maxkamadda.
7. **"Khidmada Garsoorka**" waxaa loola jeedaa Khidmadda ku waajibtay inuu bixiyo qofka ama dhinaca soo gudbiya dacwad, dacwad-celis, codsi rafcaan, rafcaan-isdhaafsi, diidmo-isdhaafsi ama codsi dib u eegis, iyo Khidmad kasta oo kale oo lagu bixinayo si waafaqsan Xeer-nidaameedkan.

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Golaha Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

8. **"Qiyaas"** waxaa loola jeedaa xadiga lacageed ee Khidmad ahaan looga bixiyo adeeg bixinta garsoorka oo lagu bixiyo si waafaqsan tacriifka ku xusan xeer-nidaameedkan.

9. **"Sabool"** waxa loola jeedaa qofka aan awoodi karin bixinta Khidmadda garsoorka ee loo ogolaado in uu ku dacwoodo saboolnimo iyada oo la raacayo sharciga ku haboon si waafaqsan Qodobka 22 (1-5) ee Xeer-nidaameedkan.

3. Fasiirada Jinsiga

Dhammaan qodobada ku jira xeer-nidaameedkan ee la xidhiidha labka sidoo kalena waa lagu dabbaqayaa dheddiga.

4 Xadka Fulineed ee Xeer-nidaameedkan

Xeer-nidaameedkan waxa uu dhaqan-gal ku yahay dhammaan dacwadaha soo gala Maxkamadaha Dawladda Deegaanka Soomaalida.

5 Ujeeddada

Xeer-nidaameedkani waxa uu yeelanayaa ujeeddooyinkan soo socda;

1. Si loo suurto geliyo sidii ay adeegyada garsoor ee ay bixiyaan Maxkamadaha DDS u noqon lahaayeeen kuwo aan wax u dhimayn xuquuqda aasaasiga ee caddaalad helidda muwaadiniinta, in qiimaha Khidmadda garsoorka iyo adeega garsoorku ay isu dhigmaan.
2. In dib-loo habeeyo nidaamka Khidmadda garsoorka islamarkaana loo suuro-geliyo hannaan garsoor oo midha-dhala, iyada oo bulshada loo fidinaayo adeeg garsoor oo hufan, casriya oo tayo leh;
3. In nidaamka garsoorku uu noqdo mid muwaadiniintu ay heli karaan, sidoo kalena aanan Maxkamadaha la horgeynin dacwad kasta oo sabab la'aan ah

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

iyo in iyada oo la xaqiijnayo isla-xisaabtanka la abuuro jawi ku haboon geed-isocodka shaqo ee garsoorka.

QAYBTA LABAAD

HABKA BIXINTA KHIDMADDA GARSOORKA

6. Habka iyo Xilliga Bixinta Khidmadda Garsoorka

Haddii aan hab-waafaqsan xeer-nidaameedkan ama sharci kale looga dhaafin khidmadda, dhinac kasta oo cabasho/dacwad u soo dhawaysta Maxkamadda waxa uu bixinayaa Khidmadda Garsoorka.

1. Rajistaraarada Maxkamadaha Deegaanka heerarkooda kala duwan waxay masuul ka yihiin cid kasta oo soo dhawaysata dacwad in ay ka qaadaan Khidmadda garsoorka, marka laga reebo kuwa xeer-nidaameedkani uu ogolaanshaha siinayo.
2. Nidaamka bixinta lacagta Khidmadda garsoorka waxaa lagu bixin karaa iyada oo la adeegsanayo; lacag caddaan ah, akoon bangi, kaadhka deynta (credit) ama habka elektaroonigga, islamarkaana ay maxkamadu uu aragto mid ku habboon.
3. Waxaa la bixinayaa lacagta Khidmadda garsoorka inta aan galka la furin, la diwaan galin Gal- sumadeedna aan lasiin ka hor.
4. Sida uu dhigayo xeer-nidaameedkani shaqaalaha ay khusayso ee maxkamadda ama Rajistaraaradu waa in isaga oo aanan xaqqiijinin bixinta lacagta Khidmadda garsoorka aanu gal-dacwadeedka ka furin maxkamadda ama uusan sababin furista gal-dacwadeedka.

5. Marka macaamiishu ay cabashadooda kusoo gudbisanayaan nidaamka e-filing, mareegta websiteka, ama khadka intarneetka waxay lacagta Khidmaddagarsoorka ku bixin karaan iyagoo adeegsanaya nidaamka adeega ee (credit Card), ama

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

adeega lacagaha ee eletrooniga ama nidaamyada kale ee ku habboon lacag-bixinta.

6. Sida ku cad qodob-hoosadka 1aad ee qodobkan Rajistaraarada heerar kooda kala duwani marka ay qaadayaan lacagta Khidmadda adeega garsoorka waa inay ka taxadaraan islamarkaana ay xaqiijiyaan in dacwadda laga hadlayaa ay tahay arrin ku saabsan lacag iyo in kale, sidoo kalena kala saaraya qiimaha saxda ah ee ku habboon in laga qaado, islamarkaana waa in uu sida ugu dhakhsaha badan ugu wareejiyaa shaqaalaha ay qusayso ee lacag qaadaha
7. Marka la xaqiijiyo in codsaduhu uu si saxa u bixiyay lacagta Khidmadda garsoorka waxaa la siinayaa warqada caddaynta ee sheegaysa inuu si saxa u bixiyay ama fariin gaaban (message) elegtarooniga, taas oo ku xidhan habka uu hadba lacagta u bixiyay.
8. Fadhiga dacwadda loo gudbiyay waa inuu xaqiijiyaa sida ku cad xeer-nidaamiyahan in la bixiyay lacagta Khidmadda adeega garsoorka.

7. Go'aaminta Caddadka Qiimaha Khimadda Garsoorka

Iyada oo loo eegayo in cabashada loo soo dhawaystay hab-waafasan xeer-nidaameedkan, ayaa cadadka qiimaha Khidmadda garsoorka waxaa lagu go'aaminayaa iyadoo laga duulayo qiimaha Khidmadda garsoorka ee ku cad xeer-nidaameedkan.

8. Dacwadaha Lagu Qiimayn karo Lacagta

Haddii dacwadda Maxkamadda loo soo dhawaystay ay tahay mid ku saabsan arrimaha lagu qimayn karo lacagta, waa in la bixiyo qiimaha Khidmadda garsoorka iyadoo laga duulayo caddadka lacagtu ay dhantahay islamarkaana loo xisaabinayo qiimaha boqolkiiba ku habboon ee ku cad shaxda qiimaha Khidmadda Garsoorka ee ku lifaaqan xeer-nidaameedkan.

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

9. **Dacwadaha aan lagu Qiimayn karin Lacagta**

Marka ay Maxkamadda soo galaan dacwadaha kala duwan ee aan la xidhiidhin arrimaha lacagta lagu qiimayn karo ee lagu xeeriyay Habka xeerka madaniga, Bayaanka aas-aaska Maxkamadaha Dawladda Deegaanka Soomaalida ama shuruucda kale waxaa loo bixinayaa Khidmadda garsoorka sidan soo socota;

1. Marka dacwadda loo soo dhawaysto maxkamadda hoose ee Degmada waxaa la bixinayaa lacag dhan 1000 Birr (Kun Birr).
2. Marka dacwadda loo soo dhawaysto Maxkamadda sare ee Gobolka waxaa la bixinayaa lacag dhan 1500 Br (Kun iyo Shan boqol oo Birr).
3. Marka dacwadda loo soo gudbiyo Maxkamadda Guud ee Deegaanka waxaa la bixinayaa lacag dhan 2000 Birr (Laba Kun oo Birr).

10. **Asbaabaha Dacwadaha isku Dhafka ee la soo Dhawaysto**

Marka dacwooduhu uu soo gudbisto hal asbaab wax ka badan oo isku dhaf ah, waxaa la bixinayaa asbaab kasta lacagta Khidmadda garsoorka ee ku habboon iyada oo la raacayo qodobada xeer-nidaameedkan.

11. **Bixinta kharashka ku saabsan Adeegyada kala duwan**

1. Marka laga reebbo dadka uu xeernidaameedkan ama shuruucda kale ay siinayaan adeeg garsoor oo bilaasha, dhammaan adeegyada ay Maxkamaddu bixiso waxaa laga qaadayaa lacagta Khidmadda garsoorka.
2. Lacagta Khidmadda garsoorka ee laga bixinayo adeegyadan hoos ku xusan waxay noqonayaan sidan soo socota:

    b). Dhinacyada doodu u dhaxayso ama waraaqda yeedhaista maragyada ee la soo saaro waxaa laaga qaadayaa dhinacyada iyo marag-kasta konton Birr (50) oo lacag ah.

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

t) Marka la qaadanayo Go'aan ama nuqul ka mida dhokumenti la roggay oo ku jira diwaanka ama elekteroonig ku jira waxaa laga qaadaya boggiiba Shan Birr (5) oo lacag ah.

j) Sida ku cad xeerka qoyska Maxkamadda marka loo soo gudbiyo dacwad ku saabsan xaqiijinta heshiis hantiyeed oo dhexmaray ninka iyo xaaskiisa waxaa laga qaadayaa 1,500 (Kun iyo Shan boqol oo birr) oo lacag ah.

x) Si ay Maxkamadu u soo saarto amar la xidhiidha talaabooyinka dhawrista hantida oo kumeel-gaadha ama xayiraad; ama garsoore loogu magacabo in uu noqdo dhexdhexaadiye , ama Cabasho kasta oo lagu dhaqan gelinayo amar maxkamaded waaxaa la bixinaya kharashaka adeega oo dhan laba kun oo birr (2000 birr)

Kh).Cabashada loo soo gudbiyo maxkamadda ee ku saabsan in ay helaan adeegga caddaymaha, islamarkaana Amar uu soo saaro garsoore/garsooreyaashu ama xirfadleyaasha kale ee Maxkamadda, dhaxal baadhaha ama shaqaalaha kale ee maxkamadda siinayaan waxaa la bixinayaa boqol birr (100 birr) oo lacag ah.

d). Cabashada racfaanka muddo dhaafka ah ama codsiga ogolaanshaha dib-u-eegista ee la soo dhawaysto waxaa la bixinayaa boqol birr (100 birr) oo lacag ah.

r). Marka Maxkamada loo soo dhawaysto cabashada adeegyada ka baxsan kuwan aan kor kusoo xusnay, waxay Maxkamaddu samaynaysaa in la bixiyo qiimaha ciwaanada isku midka ay yihiin ee uu la xidhiidho adeegyadan aan kor kusoo sheegnay mida la midka ah.

12. **<u>Khidmadda Garsoorka ee ku Saabsan Arrimaha Dib-u eegista ama Racfaanka</u>**

Iyada oo laga duulaayo awoodda iyo waajibaadka uu sharcigu siinayo, arrimaha ay eegaan hay'adaha maamulka ee kala duwan,

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

ayaa go'aanada ay gaadhaan hay'adahaasi marka Maxkamadda cabasho toos ah ama racfaan ahaan looga soo qaato waxaa la bixinayaa kharashka Khidmadda garsoorka ee hoos ku xusan;

1. Haddii Cabashada racfaanka loo soo gudbisto Maxkamadda degmada waxaa la bixinayaa kharash lacageed oo dhan kun birr (1000 birr).
2. Haddii Cabasho racfaan loo soo gudbisto Maxkamadda Sare ee Gobolka waxaa la bixinayaa kharash lacageed oo dhan laba Kun oo birr (2000 birr).
3. Haddii Cabashada racfaanka loo soo gudbisto Maxkamadda Guud ee Deegaanka waxaa la bixinayaa kharash lacageed oo dhan saddex kun birr (3000 birr).
4. Go'aan ay bixiyeen hay'adaha maamulku haddii dib-u-eegista laga soo qaato loo soo dhawaysto Maxkamadda Degmada waxaa la bixinayaa kharash lacageed oo dhan Kun iyo Shan boqol oo Bir (1500).
5. Go'aan ay bixiyeen hay'adaha maamulku haddii dib-u-eegista laga soo qaato loo soo dhawaysto Maxkamada sare ee Gobolka waxaa la bixinayaa kharash lacageed oo dhan laba Kun oo Bir (2000 birr).
6. Go'aan ay bixiyeen hay'adaha maamulku haddii dib-u-eegista laga soo qaato loo soo dhawaysto Maxkamadda sare ee Gobolka waxaa la bixinayaa kharash lacageed oo dhan laba Kun iyo Shan boqol oo Bir (2500 birr).

13. Lacagta Khidmaddaee ku Saabsan Cabashooyinka La soo Dhawaysto inta Lagu Gudda Jiro Geeddi-Socodka Dacwadda Ama Go'aanka Kadib

Marka Maxkamada loo soo dhawaysto cabasho, kadib iyada oo ay Maxkamadu arrinta ka soo saartay go'aan, xukun ama amar, ama loo soo dhawaysto codsiga soo dhexgalka geeddi-socodka dacwadda, waxaa la bixinayaa lacagta Khidmadda garsoorka ee hoos ku xusan;

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
D.D.S

1. Cabashada loo soo gudbisto in laga doodo dacwadda go'aanka laga gaadhay dacweysanaha oo maqan, waxaa laga bixinayaa Khidmad garsoor oo dhan shan-boqol oo birr (500 birr).
2. Cabashada is-hortaaga ka dhanka ah xukunka, dhinaca soo gudbistay cabashada is-hoortaagu waxa ay bixinayaan lacagta Khidmadda ee horay loo bixiyay lacag le'eg,
3. Cabashada loo soo dhawaysto in dib loogu eego xukunka, waxay dhinaca cabashada soo gudbistay bixinayaan lacagta Khidmadda ee horay loo bixiyay mid le'eg
4. Cabashada loo soo dhawaysto soo dhex-galka geeddi-socodka dacwadda, iyada oo aan loo eegayn caddadka lacagta ay doodu ka taagan tahay, waxa uu bixinayaa codsaduhu lacagta Khidmadda garsoorka oo dhan Kun birr (1000 Birr).
5. Marka uu dacweysanuhu soo gudbisto codsi ah in dhinac 3aad ay soo dhexgasho dacwadda, dacweysanuhu wuxuu bixinayaa lacagta Khidmadda oo u dhiganta heerka masuuliyadeed ee dhinaca 3aad uu ku leeyahay cadadka lacagta.

14. **<u>Lacagta Khidmadda ee ku saabsan wax-ka bedalka Cabashada</u>**

Inta lagu guda jiro geeddi-socodka dacwadda haddii mid ka mida dhinacyada is hayaa uu soo gudbisto codsi uu ku dalbanayo wax ka badelka dacwada, arintaasi awgeedna uu dib-u-dhaco geeddi-socodki dacwadu. Maxkamaddu iyada oo tixgelinaysa xaalku sida uu yahay, nidaamkii geedi-socodka dacwadda ee horay loo sameeyay heerka uu marayay, sidoo kalena la eegayo wakhtiga iyo kharashka ay Maxkamaddu ku bixisay, ayaa waxay Maxkamadu dacwad oogaha ku amri kartaa inuu bixiyo lacagta Khidmadda garsoorka ee u dhiganta.

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

15. **Khidmadda<u>Garsoorka ee laga bixiyo Xukun Fulinta</u>**

Go'áanka kolka lagaadho kadib, islamarkaasna la soo qorto codsiga xukun fulinta waxaa Khidmadda garsoorka looga qaadi hab waafaqsan sidan soo socota:-

b) Hadii xukunku salka ku hayo/ku qotomo cadad lacageed oo u dhexeeya 0-100,000 (eber ilaa boqol Kun) waxaa laga qaadi 300 oo birr (sadex boqol oo birr)

t) Hadii xukunku salka ku hayo/ku qotomo cadad lacageed oo u dhexeeya (100, 0001-200 000) (boqol Kun ilaa laba boqol oo Kun) waxaa laga qaadi 500 oo birr (Shan boqol oo birr).

j) Hadii xukunku salka ku hayo/ku qotomo cadad lacageed oo u dhexeeya (200 0001 ilaa 500 000) (laba boqol oo Kun ilaa Shan boqol oo Kun) waxaa laga qaadi 1000 birr (Kun birr)

x) Hadii xukunku salka ku hayo/ku qotomo cadad lacageed oo u dhexeeya (500 0001 ilaa 1000 000 000) (Shan boqol oo kun ilaa hal milyan) waxaa laga qaadi 1500 oo bir (kun iyo shan boqol oo birr)

kh) hadii xukunku salka ku hayo/ku qotomo cadad lacageed oo u dhexeeya (1000 0001 ilaa 10 000 000 000) (halmilyan ilaa toban milyan) waxaa laga qaadi 2000 oo birr (laba Kun oo birr)

d) Hadii xukunku salka ku hayo/ku qotomo cadad lacageed oo toban milyan iyo hal kasareeya waxaa laga qaadi cadad lacageed oo dhan 3000 oo birr (sadex Kun oo birr)

r) Xiliga lagu gudo jiro fulinta xukunka hadii hanti loo xayiro ama lagu fulinayo xukunka islamarkaasna uu cabasho soo dhawaysto qof ku doodaya in uu hantidaasi xaq ku leeyahay sidaasi darteedna xukun fulintani aanay mudnayn in lagu fuliyo, waxaa cabashadaasi laga qaadi Khidmadgarsoor oo dhan 1000 birr (Kun birr) iyada oo aanan wax tixgalin ah la siinaynin qiimaha lacag ahaan hantidaasi ay tahay

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

s) Xukun fulinta dhexdeeda arimaha aanan lagu qiimayn Karin cadad lacageed waxaa laga qaadi Khidmad garsoor oo dhan 500 oo birr (Shan boqol oo birr).

16 Khidmadda Garsoorka ee Laga Bixiyo Fulinta Dacwadaha Lagu Dhameeyo Dhex-dhexaadinta Iyo Goáanada ay Gaadhaan Hayádaha Fulinta ee Awooda Loo Siiyay

Dacwadaha Lagu Dhameeyo Dhexdhexaadinta Iyo Goáanada Ay Gaadhaan Hayádaha Fulinta ee Awooda loo Siiyay marka laga keeno codsi xukun fulin ah Khidmadda garsoorka ee laga qaadayo waxaa loo raaci hab waafaqsan arimaha lagu faah faahiyay qodobka 15aad ee xeer nidaameedkan.

17. Khidmadda Garsoorka ee Laga Bixiyo Xukun Fulinta La Xidhiidha Go'aan Lagu Gaadhay Dalka Dibeddiisa

Iyada oo laraacayo sharciga ayaa marka ay jirto shuruuc taageeraysa in goáan lagu gaadhay dalka gudihiisa laga fuliyo maxkamadaha DDS, Marka la soo dhaweysto codsiga xukun fulinta ah waxaa Khidmadda garsoorka looga qaadi hab waafaqsan arimaha lagu sheegay qodobka 14aad ee kor ku xusan.

18 Khidmadda Garsoorka ee laga Bixiynayo Dacwadaha Racfaanka ah

Dacwadaha racfaanka ah Khidmadda garsoorka ee laga bixinayo waxaa loo fulin hab waafaqsan qodobadan soo socda:-

1. Hadii ay maxkamada hoose galka xidho iyada oo aanan guda galin nuxurka rasmiga ah ee dacwada islamarkaasna kuxidhay ishortaaga koowaad ama sabab kaleba, Dhinaca aan ku qancin marka uu racfaan u qaadanayo Maxkamada racfaankaasi dhagaysigiisa awooda u leh, waxaa laga qaadi Khidmad garsoor oo dhan 500 oo bir (Shan boqol oo birr) iyada oo aanan wax tixgalin ah la siinaynin xadiga lacageed cee dacwadu ku saabsanayd.

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

2. Marka racfaan laga qaato Maxkamada hoose loona qaato Maxkamadda sare waxaa racfaanlaha laga shubi Khidmad garsoor oo u dhiganta kalabadh cadadkii uu ku bixiyay Maxkamada hoose.

3. Arinta garsoor laga dalbaday ee ku saaban lacag ama hanti hadii ay Maxkamdu badh u xukunto codsadaha codsaduhuna uu racfaan ka qaato badhkii laga diiday oo kaliya waxaa Khidmadda garsoorka looga qaadi iyada oo lagu salaynayo arimaha lagu sheegay qodob hoosaadka labaad ee qodobkan.

4. Dhinaca ku guuldaraysta go'aanka Maxkamada hoose islamarkaasna qaadanaya racfaanka isweydaarka ah (cross appeal) ama cabasho ka soo horjeed ah, isaga oo ku andacoonaya in uu jiro khaladaad xaga habraaca ah ama aan la soo saarin nuxurkii saxda ahaa ee laga soo saari lahaa dacwadan waxaa laga qaadi Khidmad garsoor o dhan 1000 birr kun biir (kun birr).

5. Hadii cabashada ka soo horjeedka ah ama racfaanka isweydaarka ah (cross appeal) ee la soo dhaweystay qayb ahaan la diido/la buriyo Khidmadda garsoorka ee laga qaadayo waxaa lagu salayn hab waafaqsan arimaha lagu sheegay farqada labaad ee qodobkan.

6. Dacwadaha la xidhiidha arimaha aan lacag ahaan lagu qiimayn Karin: Racfaanka loo qaato Maxkamada hoose iyada oo laga soo horjeedo goáanka ay gaadhaan hayádaha maamulku ama racfaanada si toos ah looga soo qaato goáanada ay gaadhaan Maxkamadaha hoose waxaa Khidmadda garsoorka ee laga qaadayo lagu salayn iyada oo laba loo qaybinayo khimaddii garsoorka ee lagu bixiyay Maxkamada hoose.

7. Goáanka ka hor, racfaanka laga qaadanayo Amarada khuseeya qabashada adeeg ku meelgaadha, waxaa laga qaadi Khidmad garsoor oo dhan (shan boqol oo birr) 500 oo birr.

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

8. Dacwadaha Maxkamada guud racfaan ahaan ugu yimaada ee Arimaha federaalka ee ay Maxkamadaha deegaanku wakaalasho ahaan ku qaadayayaan marka goáanka ay gaadho Maxkamada sare racfaan looga qaato Maxkamada guud waxaa Khidmadda garsoorka looga qaadi hab waafaqsan arimaha lagu cadeeyay qodob hoosaadka (1aad ilaa 5aad) 1-5 iyo 7aad ee qodob kan kolba sida ay ugu haboon yihiin.

9. Goáanka lagu gaadhay dhexdhexaadin marka racfaan loogu soo qaadanayo Maxkamada sare Khidmadda garsoorka ee laga qaadayaa waxay noqonaysaa khimaddii laga bixin lahaa hadii dacwadaasi la keeni lahaa Maxkamada hoose ee dagmada oo labo lo qaybiyay.

10. Goáanka lagu gaadhay dhexdhexaadin marka racfaan loogu soo qaadanayo maxkamada guud Khidmadda garsoorka ee laga qaadayaa waxay noqonaysaa khimaddii laga bixin lahaa hadii dacwadaasi la keeni lahaa Maxkamada sare ee gobolka oo labo lo qaybiyay;

11. Go'áanka lagu gaadhay dhex-dhexaadin hadii toos cabashao dib u eegiseed loogu soo qaadanayo fadhiga dib u eegista ee Maxkamada guud, iyada oo arinta lagu salaynayo cadad lacageed Khidmadda garsoorka ee laga qaadayo waxaa loo raaci qodobka 19(1) iyo 2aad ee xeer-nidaameeedkan.

19. **<u>Khidmadda Garsoorka ee laga bixinayo arimaha lagu eegayo Fadhiga dib u eegista</u>**

1. Cabashada dib u eegista ah ee la soo dhawaystay marka ay tahay mid cadad lacageed lagu qiimayn karo, hadii cabashadaasi laga soo qaatay goáanka ay gaadhay Maxkamada sare ee deegaanku waxaa u juurada garsoorka ee laga qaadayo noqonaysaa (afar meeloodoow meel)1/4 isla cashuurtii uu ku biixyay Maxkamada sare.

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

2. Cabashada dib u eegista ee la soo dhawaystay marka ay tahay mid cadad lacageed lagu qiimayn karo, hadii cabashadaasi laga soo qaatay goáanka ay gaadhay Maxkamada guud ee deegaanku waxaa u juurada garsoorka ee laga qaadayo noqonaysaa afar meeloodoow meel (¼) isla cashuurtii uu ku biixyay Maxkamada guud

3. Marka arintu khusayso arimaha lagu sheegay qodobka 12aad ee xeer-nidaameedkan, Khidmadda garsoorka ee laga qaadayo cabashada loo dhawaysanayo fadhiga dib u eegista waxay noqonaysaa kalabadh khimaddii garsoor ee lagu bixiyay maxkadii ugu danbaysay

4. Amarada ay ku jiraan in laqabto adeeg bixin ku meelgaadh ah, islamarkaasina ogolaanaya in racfaan laga qaato, marka goáanka ka hor laga qaadanayo cabasho dib u eegis ah oo amaradaasi adeega bixinta ku meelgaadhka ah khuseeya, Khidmadda laga qaadayaa waxay noqonaysaa cadadkii u danbeeyay ee uu ku bixiyay Maxkamadii racfaan ee ugu danbaysay oo laba loo qaybiyay.

5. Iyada oo la raacayo Bayaanka Aasaaska Maxkamadaha Deegaanka ee tirsigiisu yahay 206/2013 qodbkiisa 10aad (2) (2) arimaha uu fadhiga racfaanka ee heer deegaan goáan Kama danbays ah ka gaadho Khidmadda laga qaadayo waxaa lagu salayn iyada oo loo raacayo arimaha lagu sheegay farqada 1-4 e qodobkan kolba sida ay ugu haboon yihiin.

6. Cabashooyinka dib u eegista ah ee laga qaadanayo goáanada ay gaadhaan hayádaha maamulku ee loo qaadanayo fadhiga dib u eegista Khidmadda garsoorka ee laga qaadayaa waxay noqonaysaa 3000 oo birr (sadex kun oo birr).

QAYBTA SADEXAAD

ARRIMAHA KALA DUWAN

20. Isfahan la'aanta ka dhalan karta Xaddiga KhidmaddaGarsoorka

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlaqa Deegaanka Soomaaliya
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

1. Khabiirka Maxkamada ee u xilsaaran Khidmadda garsoorku waa in uu raacaa qodobada ku xusan xeer nidaameedkan
2. Hadii ay timaado muran la xidhiidha Khidmadda garsoorka oo udhexeeya khabiirka iyo danlaha/macmiilka, waa in arinta loo gudbiyaa rejistaraarka awooda u leh si uu goáan uga gaadho.
3. Rajistaraarka awooda u lehina marka uu dhagaysto dooda labada dhinac, isaga oo sal ka dhiganaya xeer-nidaamedkan, habka xeerka madaniga iyo sharciyada kale ee ku haboon, waa in uu isla wakhtigaasba si dareen dhex-dhexaadnimo leh goáan ku siiyaa isaga oo aan muddo kale siinin.
4. Goáanka la xidhiidha qoondaynta Khidmadda garsoorka ee uu bixiyay rajisteraarku hadii uu macmiilku ku qanci waayo waxa uu arinta u qaadan karaa fadhiga lahor gaynayo ee ay arintu khusayso
5. Arinta lagu sheegay arqada 4aad iyada oo ay sideeda tahay; waxaa goáanka kabib marka arinta racfaan loogu qaadanayo fadhiga racfaanka ama fadhiga dib u eegista la raacin karaa cabashada la xidhiidha goáanka laga bixiyay Khidmadda garsoorka iyada oo la xusayo sababta aanay macquul u ahayn Khidmadda lagu bixiyay Maxkamada hoose. Fadhiga cabashada loo gudbiyayna ka dib marka uu arinta baadho ayaa waxa uu Amari karaa, isaga oo saxaya in la kordhiyo hadii ay yarayd ama la dhimo hadii ay badnayd loona celiyo macmiilka hadii saa'id/dheeraad laga qaaday.

21. **<u>Xaaladaha Lagu Celin Karo Lacagta KhidmaddaGarsoorka</u>**

Lacagta loo bixiyay Khidmad garsoor waxaa qofkii bixiyay loogu celin karaa hab waafaqsan arimahan hoos ku xusan

1. Qofka dacwoodaha ah ee Khidmadda garsoorka bixyay hadii uu goáansado in uu dacwada joojiyo ka hor inta aanan galka la mudayn ama kadib kolkii la mudeeyay

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
DDS

balse aanay yeedhistu wali bixin. Inta khidmaddii uu bixiyay laga jaro boqolkiiba shan(5%) ayaa inta kalena loo celinayaa

2. Maxkamaddii dacwada loo dhawaystay kadib marka ay galka baadho hadii ay u xidho sababo la xidhiidha awood laáanta dacwoodaha ama Maxkamada oo aan awood garsoor u lahayn dacwada.khidmaddii garsoorka ee la bixiyay in ta boqolkiiba toban (10%) laga jaro ayaa baaqigana loo celinayaa dacwoodaha.
3. Hadii dacwada la joojiyo dhagaysiga kahor. khidmaddii garsoorka ee la bixiyay inta boqolkiiba shan iyo toban (15) laga jaro ayaa baaqigana la celinayaa
4. Galka lafuray ee khidmaddii garsoorkana laga bixiyay hadii loo wareejiyo dhex-dhexaadin sabab garsooraha ka timid awgeed sidoo kalena uu galku xal kuhelay dhex-dhexaadinta, waxaa dacwoodaha ama racfaanlaha lacagtii uu u bixyay Khidmadda garsoorka loogu celinayaa iyada oo la raacayo hanaanka ku xusan awaamiirta dhex-dhexaadinta.
5. Dhinacyada dacwada isku hayaayi hadii inta aan galka ladhagaysan ka hor ay arintooda heshiis ku dhameeyaan, inta khidmaddii garsoorka ee la bixiyay looga jaro habwaafaqsan farqada 2aad ee qodobkan ayaa baaqigana loo celinayaa dawoodaha. Sidoo kalena arintan waxaa lagu dabaqayaa hadii uu dacweysanuhu soo dhaweystay dacwad lid sheegad ah.
6. Dawooduhu kolkii galka la dhagaystay kadib hadii uu dacwada la laabto khidmaddii uu bixiyay si dhamaystiran/buuxda looguma celinayo.

22. <u>Arimaha aan laga bixinaynin KhidmaddaGarsoorka</u>

Arimaha lagu sheegay shuruuc kale iyada oo ay sidooda yihiin; wax Khidmad garsoor ah laga bixinmaayo arimahan hoos ku xusan

1. Arimaha laxidhiidha koriinka iyo xanaanada ilmaha

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
D D S

2. Arimaha khuseeya haweenka, caruurta & waayeelka ee ay hay'adaha maxaliga ahi soo dhaweeyaan iyaga oo uga gol leh dhaqangalinta xuquuqo-hooga aasaasiga ah ee heshiisyada caalamiga ah salka ku haya.
3. Qofka ay Maxkamadi si sharciga waafaqsan ugu xukuntay in uu kudacwoodo faylmiskiin;
4. Dacwada khusaysa arin ciqaab ah;
5. Cabashada uu qof shaqaale ahi iskii ugu soo dhaweysto Maxkamada si dib loogu eego goáan ay gaadhay Hay'ad Maamul.
6. Dhammaan hay'adaha dowladda, maadaama ay u shaqeeyaan danta dalka iyo shacabka.

QAYBTA AFRAAD

QODOBBO KALA DUWAN

23 **Awooda Soo Saarista Awaamiirta**

Maxkamada Guud ee DDS si loo dhaqan galiyo xeer nidaameedkan waxay ka soo saari kartaa awaamiir khuseysa dhaqangalinteeda.

24. **Sharciyada La Nasakhay**

Waxaa halkan lagu nashakhay sharci iyo qaab shaqeed kasta oo la xidhiidha Khidmaddagarsoorka.

25. **Mudada dhaqangalka**

Xeernidaameedkani wuxuu dhaqangalayaa laga bilaabo maalinta lagu soo daabaco Dhool Gazeetta.

Ayaan Cabdi Maxamed

Afhayeenka Golaha Deegaanka

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Jaantuska Qiimaynta KhidmaddaGarsoorka

CADADKA Khidmadda GARSOORKA KU SALAYSAN XEER-NIDAAMEEDKAN		
Cadadka lacageed ee Dacwada	KhidmadaGarsoorka ee Boqolayda (%)	Xadka Lacagta
(0 – 20,000]	10%	2,000
(20,001 – 40,000]	9%	3,600
(40,001 – 60,000]	8%	4,800
(60,001 – 80,000]	7%	5,600
(80,001 – 100,000]	6%	6,000
(100,001 – 200,000]	5.0%	10,000
(200,001 – 300,000]	4.9%	14,700
(300,001 – 400,000]	4.8%	19,200
(400,001 – 500,000]	4.7%	23,500
(500,001 – 600,000]	4.6%	27,600
(600,001 – 700,000]	4.5%	31,500
(700,001 – 800,000]	4.4%	35,200
(800,001 – 900,000]	4.3%	38,700
(900,001 – 1,000,000]	4.2%	42,000
(1,000,001 – 2,000,000]	4.1%	82,000
(2,000,001 – 3,000,000]	4.0%	120,000
(3.000,001 – 4,000,000]	3.9%	156,000
(4,000,001 – 5,000,000]	3.8%	190,000
(5,000,001 – 6,000,000]	3.7%	222,000

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida Xafiiska Golaha Xildhibaanada DDS

(6,000,001 – 7,000,000]	3.6%	252,000
(7,000,001 – 8,000,000]	3.5%	280,000
(8,000,001 –9,000,000]	3.4%	306,000
(9,000,001 – 10,000,000]	3.3%	330,000
(10,000,001 – 20,000,000]	2.9%	580,000
(20,000,001 –30,000,000]	2.8%	840,000
(30,000,001 – 40,000,000]	2.7%	1,080,000
(40,000,001 – 50,000,000]	2.6%	1,300,000
(50,000,001 – 60,000,000]	2.5%	1,500,000
(60,000,001 – 70,000,000]	2.4%	1,680,000
(70,000,001 – 80,000,000]	2.3%	1,840,000
(80,000,001 – 90,000,000]	2.2%	1,980,000
(90,000,001 – 100,000,000]	2.1%	2,100,000
100,000,001 – 200,000,000]	1.9%	3,800,000
(200,000,001 – 300,000,000]	1.8%	5,400,000
(300,000,001 – 400,000,000]	1.7%	6,800,000
(400,000,001 – 500,000,000]	1.6%	8,000,000
(500,000,001 – 600,000,000]	1.5%	9,000,000
(600,000,001- 700,000,000]	1.4%	9,800,000
(700,000,001- 800,000,000]	1.3%	10,400,000
(800,000,001- 900,000,000]	1.2%	10,800,000
(900,000,001-1,000,000,000]	1.1%	11,000,000
(1,000,000,001 iyo wixii ka sareeya)	1%	

Ayaan Cabdi Maxamed
Afhayeenka Golaha
Xildhibaanada DDS

Dawlada Deegaanka Soomaalida
Xafiiska Golaha Xildhibaanada
D.D.S